Warbixinta Oktoobar 2023 ilaa Sebteembar 2024

# WARBIXINTA GUULAHA IYO HADAFYADA TITLE VI - WAAXDA GAADIIDKA EE GOBALKA WASHINGTON (WASHINGTON STATE DEPARTMENT OF TRANSPORTATION, WSDOT)

Qeexitaankan waxa loogu talagalay Local Public Agency (LPA) iyo hay'adaha kale ee dawliga ah si ay uga warbixiyaan hawlaha Title VI ee dhacay sanadkii la soo dhaafay oo ayna ka warbixiyaan yoolalka Title VI sanadka soo socda. Warbixinada waa in la soo celiyo markay tahay ama ka hor taariikhda la filayo si loo buuxiyo shuruudaha u qalmida ee maalgelinta dawlada dhexe. Ku dir TitleVI@WSDOT.wa.gov

*TAARIIKHAHA AY KU EGTAHAY:* Eeg Qaybta 28.3 ee waqtiga warbixinta la qorsheeyay iyo taariikhda kama dambeysta ah

## Warbixinta Xiriirka

**Magaca iyo jagada maamulka (saxiixa Xaqiijinta Habboon):** Pete Mayer, Agaasimaha Hawlaha Guud

**Ciwaanka Boostada:** 6300 Southcenter Blvd, Suite 209

**Magaalada:** Tukwila, WA **Koodhka Boostada:** 98188 **Gobalka:** King

**Lambarka Taleefoonka:**(206) 200-5882 **ciwaanka iimaylka:** Pete.Mayer@TukwilaWA.gov

**Magaca iyo jagada madaxa guud ee adeegyada gaadiidka la xariira:** Pete Mayer, Agaasimaha Hawlaha Guud

**Ciwaanka Boostada:** 6300 Southcenter Blvd, Suite 209

**Magaalada:** Tukwila, WA **Koodhka Boostada:** 98188 **Gobalka:** King

**Lambarka Talefoonka:** (206) 200-5882 **ciwaanka iimaylka:** Pete.Mayer@TukwilaWA.gov

**Magaca iyo jagada Iskuduwaha loo xilsaaray Title VI*:** Catrien de Boer, Falan-qeeyaha Deeqda Hawlaha Guud

**Ciwaanka Boostada:** 6300 Southcenter Blvd, Suite 209

**Magaalada:** Tukwila, WA **Koodhka Boostada:** 98188 **Gobalka:** King

**Lambarka Talefoonka:** 206-482-9199 **ciwaanka iimaylka:** Catrien.deBoer@TukwilaWA.gov

*Marka la badelo iskuduwaha Title VI, u sheeg TitleVI@WSDOT.wa.gov 30 maalmood gudahood.

---

Si loogu ho'aansamo shuruudaha Title VI, warbixin kasta oo lasoo gudbiyo sanadkii waa inay la socdo Heerka Tayada (USDOT1050.2A).

## Guulaha

1. **Ma jiraan wax isbadelo ah oo lagu sameeyay Qorshaha Title VI ee la ansixiyay oo aan loo soo sheegin Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqaha Madaniga (Office of Equity and Civil Rights, OECR)?**

   Iyada oo la tixgalinayo soo qaadashada Qorshaha Title VI, City of Tukwila waxay ogolaatay inay u hogaansanto Qorshaha Title VI ee WSDOT. Pete Mayer waxaa saxeexa City of Tukwila wuxuuna saxeexaa Warqada loogu talagalay U Hogaansanaanta Qorshaha Title VI ee WSDOT ee la gudbiyay.

   Intaas waxaa dheer, City of Tukwila waxay hirgelisay Qorshaha Helitaanka Luuqada (Hoos lagu soo lifaaqay) kaas oo sheegaya in dhammaan shaqaalaha ay tahay inay sameeyaan dadaal macquul ah si ay u siiyaan adeegyo loo siman yahay dadka Heerka Aqoontooda Kooban ee Ingiriiska (Limited English proficiency, LEP).

2. **Ururka, Shaqaalaha, iyo Hab dhismeedka: Sharax qaab dhismeedka warbixinta Barnaamijka Title VI oo ay ku jiraan Iskuduwaha Title VI, Madaxa Maamulka, iyo shaqaalaha la xiriira gaadiidka. Liisku waa inuu leeyahay magaca, jinsiga, midabka, iyo asalka qaran ee shaqsi kasta. Ku dar faahfaahinta qaar kamid haddii LPA-gaaga uu leeyahay guddi mutadawiciin ah ama loo magacaabay oo la xiriira go'aanada ka gaarista gaadiidka.**

   Iskuduwaha Title VI wuxuu mas'uul ka yahay ka qaybgalka Tababarka Title VI, Isgaarsiinta, iyo warbixinada u hogaansanaanta xeerka. Agaasimaha Hawlada Guud wuxuu kormeeraa doorka shaqada Iskuduwaha Title VI wuxuuna maareeyaa waaxda si loo hubiyo in xeerarka Title VI loo hogaansamay. Agaasimaha Hawlaha Guud sidoo kale waa Madaxa Maamulka waaxda waana hay'ada maamusha dhukumiintiyada Title VI iyo warbixinada.

   Iskuduwaha Title VI, Catrien de Boer, waa haweeney caddaan ah oo ku dhalatay Mareykanka. Agaasimaha Hawlaha Guud, Pete Mayer, waa nin caddaan ah oo ku dhashay Mareykanka.

   Shaxda Ururka ee Title VI ee City of Tukwila ayaa hoos lagu soo lifaaqay.

3. **Macluumaadka Bulshada: Adoo adeegsanaay akhariidada xuduudaha LPA, sharax tirada dadka ee ku nool aagga adeegga LPA (tusaale ahaan, jinsiyada, qowmiyadada, iyo asal qaran). Qor, luuqadaha shaqsi kasta, boqolkiiba tirada dadka aqoonta Ingiriiskoodu xaddidan yahay. Haddii tirada LPA ee Ingiriiskoodu xadidan yahay tahay 5% tirada guud ee dadka ama 1,000 shaqsi, hadba kii yar, sharax Falanqeynta Afarta-arrin adoo ka jawaabaya bayaanada ku qoran bogga soo socda.**

   1. **Si kooban u sharax tirada dadka LEP ee loo adeegay iyo luuqadaha looga hadlo aagga adeega.**
   2. **Si kooban u sharax inta jeer ee lala xiriiro dadka LEP ee adeegyada hela ama mashaariicda (tusaale ahaan, isdhexgalka adeegga macaamiisha, shirarka dadwaynaha, iyo qandaraasyada bixinada iyo siinta qandaraasyo).**
   3. **Si kooban u sharax muhiimada ay leeyiiin barnaamijka, waxqabadka, ama adeegga nolosha dadka leh LEP.**
   4. **Si kooban u sharax kheyraadka hadda la heli karo ee loo heli karo dadka LEP iyo qiimahooda guud.**

Hoos waxaa ku lifaaqan laba ilo xog oo kala duwan oo bixinaya tirakoobka aagga adeegga Tukwila: Xogta Degmo Dugsiyeedka American Community Survey (ACS) iyo US Census Bureau QuickFacts (2023

1. City of Tukwila waxay isticmaashay xogta luuqada kala-soocida ee lagu bixiyo Aagga Xogta Isticmaalka Hoose ee Dadwaynaha (Public Use Microdata Area, PUMA) si loo go'aamiyo dadka LEP ee u qalma. Isbaanishku waa luuqada keliya ee buuxisa Shuruuda Bixinta Title VI si loo turjumo luuqada; Hase yeeshee, qorshaha luuqada ee Magaalada ee la ansixiyay waxaa ka mid ah bixinta turjumaada dukumiintiyad amuhiimka ah oo ku qoran Vietnamese iyo Soomaali. Arrintaan waxaa sababay tirada dadka degan aagga iyo sidoo kale kuwa ilaaliya ganacsiyada iyo xarumaha dhaqanka ee muhiimka ah sida Xarunta Islaamka ee Abubakr iyo Kaniisada Kiristaanka Fiyatnaamiis. Bishii Oktoobar, 42 dukumiinti loo aqoonsaday inay yihiin muhiim ayaa loo turjumay Luuqadaha baahida loo qabo.

   Fiiro gaar ah: Tukwila waxay ka kooban yahay Degmada PUMA King (West Central)--Burien, SeaTac, Magaalooyinka Tukwila iyo White Center PUMA; Washington

| **Luuqada** | **Boqolaylda** | **Heerka** | **Tirada Dadka** |
|---|---|---|---|
| Ku hadla Ingiriis oo kaliya | 60.4 | 1 | 11879.71 |
| Isbaanish | 15 | 2 | 2950.12 |
| Amxaarig, Soomaali, ama luuqad kale Luuqadaha Waqooyiga Afrika looga hadlo | 5.7 | 3 | 1123.53 |
| Fiitnaamiis | 4.6 | 4 | 907.06 |

2. Wakhti xaadirkaan bogagaga Magaalada waxaa la turjumay ayadoo la adeegsanaayo GTranslate. Webseedka Mashruuca Qorshaha Balaaran ee Tukwila wuxuu leeyahay dookh ay booqdasyaasha si ootamaatig ah ku isticmaali karaan Google Translate. Ma heyno xog ku saabsan inta jeer ee dookhaan la isticmaalay, laakiin waxaa loo heli karaa dadka LEP ee xiiseynaya inay xog badan ka bartaan mashruuca. Sidoo kale, qaybo badan oo ka mid ah waxay adeegsadaan LanguageLine Solutions si ay u helaan turjumaada lagu bixiyo taleefoonka. Tan waxaa ka mid ah Hawlaha Guud, Adeegyada Bulshada, Waaxda Horumarinta Bulshada, Maaliyada Karaaniga, iyo Waaxda Booliska. Police Department (PD) si gaar ah ayaa loogu dalacaa kharashka, adeegsigoodana hoos lagu muujin. Isbaanishku waa luuqada ugu badan ee la codsado Adeegyada Bulshadana ayaana ah waxa ugu badan ee la isticmaalo. Laga bilaabo Janaayo 1 – Oktoobar, isticmaalka LanguageLine wuxuu ahaa sidaan soo socota:

    | **Luuqada** | **Wicitaanada** | **Daqiiqadaha** |
    |---|---|---|
    | ISBAANISH | 18 | 299.4 |
    | FARANSIIS | 7 | 93.5 |
    | DARI | 3 | 75.7 |
    | AMXAARI | 2 | 55.7 |
    | MANDARIN | 2 | 68.8 |
    | LUUQADA RUUSHKA | 1 | 17.2 |

    Shaqaalaha safka hore ee Magaalada waxay wax ka qabtaan baahiyaha noqnoqoshada kala duwan ee macaamiisha LEP waxayna gacan ka geystaan helida turjumaanka xirfadley ah, shaqaale luuqado badan ku hadla marka la heli karo, turjumaan qolyo saddexaad oo macmiilku la yimaado si uu kugu fasixo luuqada, iyo ilaha guud (sida laga soo xigtay wareysiyada shaqaalaha ee laga sameeyay mawduuca). Dhammaan xiriirada hadda la raad raaco.

3. Adeegyada magaalada waa kuwo qiimo go'an lahayn oo loogu talagalay nolosha dadka degaan ee qaba LEP, mulkiilayaasha ganacsiga, iyo booqdayaasha. Sababtaas awgeed, Magaaladu waxay heshiis la gashay hogaamiyaasha ku hadla Isbaanishka, Vietnamese, Soomaali, Sawaaxiliga, Dari, iyo bulshooyinka ku hadla Burmese si ay wax uga bartaan mudnaanta adeegga inta lagu jiro geeddi socodka miisaaniyadda labada sano ah. Intaa waxaa sii dheer, Magaaladu waxay bixisaa barnaamij sanadle ah oo loogu talagalay dadka deegaanka ee kala duwan si ay u bartaan sida ay u shaqeyso dowladda magaalada si loo kordhiyo ku lug lahaanshahooda hawlaha madaniga ah. Sanadkaan barnaamijka wuxuu ku baxayaa Ingiriis iyadoo la adeegsanayo tarjumaada Isbaanishka.

4. Magaaladu waxay isticmaashaa nooca bilaash ah ee GTranslate oo loogu talagalay tarjumaadaha bogga. Adeegyada luuqada waxaa laga heli karaa 24/7/365 in ka badan 240 luuqadood. Kharashka sannadlaha ah ee hadda waa qiyaastii $1,000. Magaaladu waxay wax ka baranaysaa inay ku darto Jawaabta Tooska ah, Adeegga LanguageLine wuxuu u oggolaanayaa xubnaha bulshada inay wacaan waaxyaha ay doortaan iyagoo la kaashanaayo meenuga luqada ee fursadaha adeegga iyo xiriir toos ah oo ay la yeeshaan turjubaan. Kharashka la filaayo ee

adeegan ku baxaaya waa $6,000 si ay u bilaabaan. Ilaa iyo hadda, laynka miisaaniyada Magaalada ee Fasurka/Turjumaada waxay gaareen qiyaastii $72,000 magaalada oo dhan marka la eegi sanadka 2024. Gaar ahaan arrintaan waxaa ku jira qiyaastii $45,000 oo loogu talagalay maamulka maxkamada iyo $ 12,000 oo loogu talagalay tarjumaadaha dukumiintiyada muhiimka ah.

Maadaama ay qayb ka tahay Qorshaha Helitaanka Luuqada ee dhawaan la ansixiyay ee Magaalada waxaan sii wadi doonnaa raadinta fursadaha si aan si fiican ula xiriirno dadka LEP qaba oo aan u jaangooyno raadraaca isdhexgalka. Tusaalooyin gudaha Hawlaha Guud:

- Laga soo bilaabo Maarso ilaa Maayo ee sanadkaan, xubnaha Hawlaha Guud waxay ka qaybqaateen wareysiyo taxane ah oo hoggaamiyaasha bulshada lala yeeshay si ay si fiican ugu fahmaan dhaqamada iyo isgaarsiinta bulshada ku hadasha Isbaanishka, Fiyatnaamiiska, Soomaaliga, Sawaaxiliga, Dari, iyo dadka ku hadla Burma.
- Laga bilaabo Sebteembar, shaqaale katirsan Shaqooyinka Dadwaynaha ayaa bilaabay koox shaqo oo ka kooban qeybaha kala duwan si loo horumariyo heerarka wacyigelinra dadweynaha, oo ay ku jiraan dadka LEP qaba.
- Sebteembar/Oktoobar, Public Works waxay ku tarjumeen dukumiintiyada soo socda Isbaanish, Soomaali, iyo Vietnamese: Ogeysiiska Trim Vegetation, Liiska Hubinta Adeegga Biyaha, Ogeysiiska Biyo Xirista, Warbixinta Tayada Biyaha ee sanadkii 2023, iyo ogeysiis ciwaankiisu yahay, “Sunta iyo naxaasta iyo biyaha aad cabto – ma khatar baad ku jirtaa?”
- Bishii Nofeembar, koox ka socota kooxaha waaxaha oo ay ku jiraan shaqaalaha Hawlaha Guud ayaa bilaabay inay kulmaan si ay uga wada hadlaan Siyaasada Isticmaalka AI, oo ay ku jiraan ujeeddooyinka tarjumaada.

4. **Cabashooyinka: Bixi nuqul ka mid ah diiwaanka cabashada Title VI ee LPA, oo ay ku jiraan cabashooyinka cusub ee Title VI ee la helay inta lagu jiray muddada warbixinta iyo wax kasta oo weli rahman. Ku dar sababta cabashada (jinsiga, midabka, asalka qaranka) oo sharax mowqifka (xaaladda/natiijada).**

   Ma jiraan cabashooyin la xiriira Title VI oo la soo gudbiyay muddadaan warbixinta.

5. **Qorshaynta: Qeex howlaha qorsheynta gaadiidka ee la fuliyay muddadaan warbixinta. Qeex tallaabooyinka la qaaday si kor loogu qaado u hoggaansanaanta Title VI ee ku saabsan qorshaynta gaadiidka, oo ay ku jiraan kormeerka iyo dib u eegista habraacyada, ka-qaybgalka bulshada, natiijadooda ama xaaladdooda. Waxaa ka mid ah tusaalooyin ku saabsan wacyi-gelinta bulshada.**

   Mashruuca Badelka ee 42nd Ave S Bridge - Magaaladu waxay heshay hadafka 0% Disadvantaged Business Enterprise (DBE) oo loogu talagalay naqshadeynta mashruucaan, hase yeeshee, inta lagu jiray muddada warbixinta, TranTech Engineering, LLC ayaa ahayd la-taliyaha koowaad waxayna ahayd shirkaday aqoonsan tahay DBE. Wacyi-gelinta bulshada iyo ka qayb qaadashada waxaa lagu qabtay xaafadda Allentown waxaana loo qabtaa si aan joogto ah ahayn laga soo bilaabo Maarso 2021 ilaa hadda. Intii lagu jiray mudadan warbixinta, Magaalada waxay ka qaybgashay Kulanada Bulshada Allentown markay taariikhdu ahayd 2/27/2024, 5/28/2024, 6/25/2024, iyo 8/27/2024. Ogaysiisku wuxuu ka kooban yahay isku darka dhacdooyinka toos ah iyo xogaha cusub ee isgaarsiinta iimaylka ee ku meel-gaarka ah. Ma jiraan wax agab ah oo la qaybiyay waqti hore, PowerPoints iyo bandhigyada boostada ayaa la adeegsaday inta lagu jiray kulanada, daqiiqado ayaana la diray ka dib kulanka. Waxay noqon karaan

   Dayactirka iyo Guud marka Sanadlaha ah ee 2024 – Ma jiro yool DBE ah oo loo qoondeeyay mashruucan oo si gaar ah loogu maalgeliyo lacagaha Magaalada. Barnaamijka Guud ee sanadlaha ah wuxuu doortaa wadooyinka si loogu sameeyo guud marka ku saleysan nidaamka qiimeynta sayniska. Wadooyinka leh qiimeynta ugu hooseeysa ayaa la dayactiraa marka koowaad, maaddaama maalgelin la heli karo, shaqaduna caadi ahaan waxaa loo kala qaybiyaa aagagga guryaha iyo

ganacsiga ee Magaalada gudaheeda. Dadka deegaanka degan ayaa sidoo kale ka warbixin kara caqabadaha jira iyadooo loo marayo qalabka warbixinta ee Magaalada ee khadka tooska ah ee Tukwila Works.

65th Ave iyo Southcenter Blvd Signal – Mashruucaan waxaa maalgeliya Guddiga Horumarinta Gaadiidka, iyadoo la adeegsanaayo maalgelinada gobolka. Magaalada waxay sameysay falanqeyn dammaanad sanadkii 2017 waxayna ka bilawday shaqada naqshadeynta ee cilada jira lagu xalinaayo 65th iyo Southcenter Blvd horraantii 2024. Naqshadeynta mashruuca ayaa inuu dhamaado marka la dhisana, waxay yareyn doontaa xawaaraha Southcenter Blvd. waxayna bixin doontaa wadooyin ammaan ah oo loogu talagalay rakaabka gaadiidka ee isticmaala boosteejada basaska tareenka ee King County ee Southcenter Blvd.

6. **Talaabooyinka saxda ah: Qeex wax qabadyada inta lagu jiro muddadaan warbixinta ee la xiriira iibsiga, iibinta, kirada/isticmaalka, ama wareejinta hantida dhabta ah (oo la xiriirta gaadiidka wadooyinka waaweyn/isticmaalka wadada midig ee dadweynaha). Ku dar macluumaadka dadwaynaha ee dadka saameyntu gaartay. Tusaale ahaan, isirka, midabka, wadanka u dhalasho ee hantida/mulkiilaha(yaasha) ganacsiga/kiraystaha(yaasha) ee ay saameyntu gaartay.**

   Magaaladu ma aysan iibsan ama ma wareejin wax hanti oo dhab ah inta lagu jiray muddadaan warbixinta.

7. **Aqoonso cidda saddexaad ee sameysa qiimaha iyo shaqaalaha iibsiga (ee la isticmaalay mudadaan warbixinta) ayadoo la adeegsanaayo jinsiga, midabka, asalka qaranka.**

   Ma jiraan qolyo saddexaad oo qiimo sameeya sax ah oo loo adeegsaday iyadoo lala kaashanayo mashruuc gaadiid wado wayn inta lagu jiray muddadaan warbixinta.

8. **Daraasadaha iyo Qorshayaasha: Ma jiraan daraasado gaadiid (oo ay ku jiraan dib u eegista deegaanka) oo la sameeyay ama qorshayaal gaadiid oo la dhammaystiray muddada warbixintaan? Aqoonso ilaha xogta iyo bixinta soo koobida xogta (Title VI/Falanqeynta Caddaaladda Deegaanka) ee la xiriira qowmiyadaha, isirka, luuqadaha looga hadlo deegaanka, xaafadaha, heerarka dakhliga, deegaanka jireed, iyo/ama dhaqanada safarka. Sharax sida xogta loogu isticmaalay daraasadahaan/dib u eegistaan/qorshooyinkaan.**

   Astaamaha Gaadiidka ee Qorshaha Balaaran – Ma jiro hadaf DBE ah oo loogu talagalay mashruucaan. Magaalada ayaa wada inay cusbooneysiiso Astaanta Gaadiidka ee Qorshaha Balaaran iyo Qorshaha Badqabka Wadooyinka ee Deegaanka. Astaanta Gaadiidka ee Qorshaha Balaaran ee Gaadiidka City of Tukwila wuxuu dejiyaa yoolalka gaadiidka Tukwila iyo siyaasadaha loogu talagalay 20 ka sano ee soo socda si loo daboolo baahiyaha hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee Magaalada. Yoolalku waxay diirada saaraan dhammaan noocyada gaadiidka: sida baaskiilka, socodka, duubista, qaadashada gaadiidka, iyo wadista. Qorshaha Balaaran waa dukumiinti hagid oo muddada dheer ama "faahfaahin" sharaxaysa qiimaha iyo mudnaanta bulshada si loo hago koritaanka iyo horumarka. Nidaamka Gaadiidka wuxuu saadaaliyaa isbadelada iyo baahiyaha xarumaha gaadiidka kajira wuxuuna bixiyaa hagitaan gaar ah oo loogu talagalay mashruucyada mustaqbalka. Magaalada iyo la-taliyaha, Fehr iyo Peers ayaa xaadir ku ahaa xaafada iyagoo codsanaya jawaab celinta dadka deegaanka. Kooxdu waxay ka qayb qaadatay munaasabadaha bandhiga Qorshaha Balaaran ee Magaalada oo dhan 9/20/2023 iyo 2/1/2024. Sidoo kale waxaa jiray "Nidaam fikrad" oo qayb ka ah Webseedka Xarunta Ka qaybgalka Magaalada oo halkaan laga heli karo: https://makers.mysocialpinpoint.com/tukwila-engagement-hub/ideas#/


   Bayaanka Saameynta Deegaanka- City of Tukwila waxay samaynaysaa Bayaanka Saameynta Deegaanka (Environmental Impact Statement, EIS) si loo qiimeeyo badelka dib u soo celinta taraafikada gawaarida ee BNSF ee hadda ka jira ee Allentown. Arintan waxaa lagu maalgeliyaa oo keliya maalgelinada magaalada. EIS waa nidaam lagu qiimeeyo saameynta suurtagalka ah ee la soo


jeediyay ee la xariira isbadelka laga yaabo inuu ku yeesho deegaanka la dhisay iyo deegaanka dabiiciga ah iyo dadka deegaanka. Ma jirto xog gaar ah oo la xiriirta qowmiyadaha, jinsiyadaha, luuqadaha lagu hadlo, ama heerarka dakhliga la uruuriyo oo qayb ka ah daraasadaan. Hase yeeshee, shaqaaluhu waxay ka shaqaynayeen sidii ay u kala fogeyn lahaayeen kulanada, iyagoo bixinaaya madal kala duwan oo faallooyin dadweyne lagu soo bandhigo, iyo fursado ay ku maqlaan fikradaha kaladuwan ee dadka deegaanka oo ay arrintaan saameysay. Intaa waxaa sii dheer, iyadoo la daraaseynaayo saameynta deegaanka la dhisay iyo deegaanka dabiiciga ah, waxaa la filayaa in dadka taariikh ahaan la kulmay wasakhda hawada iyo carqaladaha aagga, ay ku jiraan safka hore si looga fogaado waxyeellada joogtada ah iyo tan mustaqbalka. Wacyi-gelinta bulshada iyo ka qayb qaadashada waxaa lagu qabtay xaafadda Allentown waxaana loo qabtaa si aan joogto ah ahayn laga soo bilaabo Maarso 2021 ilaa hadda. Intii lagu jiray mudadan warbixinta, Magaalada waxay ka qaybgashay Kulanada Bulshada Allentown markay taariikhdu ahayd 2/27/2024, 5/28/2024, 6/25/2024, iyo 8/27/2024. Ogaysiisku wuxuu ka kooban yahay isku darka dhacdooyinka toos ah iyo xogaha cusub ee isgaarsiinta iimaylka ee ku meel-gaarka ah.

9. **Goobta iyo Naqshada Mashruuca: Bixi liistada mashruucyada dhismaha ee bilaabmay muddadaan warbixinta. Adiga oo isticmaalaya khariidada aagga adeegga LPAs, aqoonso goobaha mashruuca, oo sharaxaad kooban ka bixi faa'iidooyinka/caqabadaha mashruucyada ay ku yeelan karaan dadka ay saameeyeen. Haddii ay suurtagal tahay, bixi khariidad muujinaysa mashruucyada oo leh xaafayada dadka ay saameynta la kulmay.**


Khariidadaha hoose waxay muujinayaan mashruuc kasta oo leh tirakoobka deegaanka iyo sawiro qaybta midig ka muuqda. Xogtaan waxaa soo saaray Nidaamka Qiimeynta Caddaalada Dhaqaalaha iyo Cimilada Mareykanka.

Dayactirka iyo Hagaajinta Sanadlaha ah ee 2024 – Dhowr goobood ayaa wax laga qabtay 2024. Dayactirada gaarka ah ee goob kasta way kala duwan yihiin, laakiin waxaa ku jira calaamado cusub, sagxad sameyn, iyo/ama hagaajinta Americans with Disabilities Act (ADA) si kor loogu qaado meelaha taaga ah iyo geesaha wada ee la maro.
Barnaamijka Guud ee sanadlaha ah wuxuu doortaa wadooyinka si loogu sameeyo guud marka ku saleysan nidaamka qiimeynta sayniska. Wadooyinka leh qiimeynta ugu hooseeya ayaa marka hore la sameeyaa, maadaama maalgelin la heli karo. Mashruucaan ayaa looga faa'ideeyay dadka ay saameeyeen iyadoo la ilaalinaayo oo la dhowraayo qaab dhismeedka waddooyinka iyo sidii looga dhigi lahaa kuwo ammaan ah oo degan. Mashruucaan ayaa xiray waddooyinka inta dhismuhu socdo, taas oo ahayd culeys muddo gaaban ay la kulmeen dadka. Waxaa kamid ahaa sadexda waddo oo sanadkan lagu daray. Waxaa lagu muujiyay khariidada hoose, 50th Pl iyo S 114th Pl ee xaafadda Allentown iyo wadooyinka guryaha ee xaafadda Riverton.


Search for an address, city, state or ZIP
Tract information
Number: 53033026300
County: King County
State: Washington
Population: 1,588
Tract demographics
Race / Ethnicity (Hide)
White 26%
Black or African American 2%
American Indian and Alaska Native 0%
Asian 41%
Native Hawaiian or Pacific Islander 10%
Other 2%
Two or more races 16%
Hispanic or Latino 8%
Age (Show)
Identified as disadvantaged?
NO
This tract is not considered disadvantaged. It does not meet any burden thresholds OR at least one associated socioeconomic threshold.
Send feedback
Climate change
Duwamish Hill Preserve
Allentown
Tukwila Community Center Park
Best Cafe & Teriyaki



Search for an address, city, state or ZIP
Population: 2,601
Tract demographics
Race / Ethnicity (Hide)
White 33%
Black or African American 18%
American Indian and Alaska Native 0%
Asian 19%
Native Hawaiian or Pacific Islander 0%
Other 17%
Two or more races 7%
Hispanic or Latino 18%
Age (Show)
Identified as disadvantaged?
YES
This tract is considered disadvantaged because it meets 1 burden threshold AND the associated socioeconomic threshold.
Send feedback
Climate change
Metro Interim Base
Intergate Seattle East Building 5
The Offices at Tukwila
Harry's of Allentown
Tukwila Community Center Park
Suburban Propane
Top Line Market
IsoFusion

Green River Trail – Mashruucaan wuxuu balaarinayaa wadada wuxuuna ka dhigayaa illaa 12 fuudh waxaana laga dhisi doonaa sidoo kale cirifyada geesaha wadada ee adag. Nalalka ayaa sii socon doona laga bilaabo buundada Tukwila ee ay dadku maraan ee dhawaan la dhisay ilaa wadada sida guud loo isticmaalo ee wadada Christensen, dayactirka wadada si loo dhiirrigeliyo in la isticmaalo. Tani waa isku xirka maqan oo ah wado aysan marin gaadiidka oo isku xirta Tukwila una dhaxeysa boosteejada Sounder illaa qaybta bari iyo Xarunta Gaadiidka ee Tukwila illaa galbeedka. Xidigta hoos ka muuqata waxay muujinaysaa meesha mashruuca isku xiraya Wadada Green River uu ka socdo, oo ah degmo ganacsi.




10. **Kulanada kale ee Dadweynaha: Liistada kulanada kale ee dadwaynaha ee la qabtay inta lagu jiray mudadaan warbixinta. Aqoonso dadaalada loo adeegsaday in lagu dhiirrigeliyo inay muwaadiiintu ka qayb galaan kulanadaas. Taariikhaha, waqtiyada, goobaha, imaanshaha faahfaahsan, iyo bixinta tusaalooyin ku saabsan agabyada wacyi-gelinta.**

Magaaladu waxay xubnaha bulshada ku casuuntay dood furan oo ka dhacaysa Xarunta Sullivan lana qabtay 1da Febraayo, 2024 si ay u bartaan oo ay usoo bandhigaan fikradaha ku saabsan qorshaynta yoolalka Qorshaha Balaaran iyo siyaasadaha walxaha la xiriira. Macluumaadka iyo bandhigyada is-dhexgalka ayaa la bixiyay si loogu adeegsado isticmaalka dhulka ee Qorshaha Balaaran, gaadiidka, guryaha, adeegyada, xarumaha Deegaanka, iyo hawlaha deegaanka ee dabiiciga ah. Hoos waxaa ka muuqda sawir muujinaya mid ka mid ah bandhigyada is-dhexgalka. Kulankan waxaa loogu talagalay inuu noqdo hab aan rasmi ahayn oo dadka deegaanka ay tixraacaan oo ayna wax badan ka bartaan. Magaaladu waxay isku dayday dadaal si kala fogeyso doodaha furan oo la qabto maalmo kaladuwan ee asbuuca iyo waqtiyo kaladuwan inta lagu jiray 2 sano ee lasoo dhaafay si ay loo dhiirigeliyo ka qaybgalayaasha. Tukwila ayaa sidoo kale bixisay cunto iyo cabitaano inta badan munaasabadaha.


City of Tukwila
Comprehensive Plan Transportation Element
WHAT DO YOU THINK ABOUT THESE TRANSPORTATION COMMENTS?
Here are key themes we heard through public outreach. Did we hear you correctly?
Vote your top 5 ideas!
COMMENTS
VOTES
BIKING
3 Want to bike to Seattle via East Marginal Way S.
4 It's hard to bike to Boeing Field, Georgetown, and SODO.
5 It's uncomfortable to bike on Southcenter Boulevard.
6 Want better connections to bike to McMicken via 51st Ave S.
7 Southcenter Mall is difficult to access by bike.
8 Want to bike to Renton.
VEHICLE
9 Want slower cars on 42nd Ave S.
10 More parking near Tukwila International Boulevard Station.
11 Want slower cars on 51st Ave S.
12 Want slower cars on Southcenter Parkway.
WALK/ROLL
13 The intersection of E Marginal Way and S 112th St is uncomfortable for pedestrians.
14 Want more sidewalks in Allentown.
15 Sidewalks missing along Macadam Rd S.
16 Sidewalks missing along 40th Ave S.
17 Hard to walk on Tukwila International Blvd with cars parked on sidewalks.
18 It's uncomfortable to walk or bike across I-5 on the S 144th St bridge.
19 Sidewalks missing on S 160th St.
20 It's hard to walk between Southcenter Mall, Tukwila Sounder Station, and the Interurban Trail.
21 It's hard to walk to and around Tukwila Pond Park.
OTHER
1 More lighting in Ryan Hill.
2 Clean up Green River Trail / Interurban Trail.
TRANSIT
22 Better security and enforcement at TIB Station
23 Want better transit connections between light rail and Southcenter
24 Want to get to more places from the Tukwila Sounder Station and have more frequent trips
Tukwila
SEATTLE-TACOMA INTERNATIONAL AIRPORT
Want to bike/
walk between

**1. Aqoonsashada xubnaha qorsheynta gaadiidka LPA iyo/ama kooxaha la-talinta jinsiyad, midab, iyo asal qaran.** Ma khuseyso

**2. Sheegida hababka loo isticmaalo uruurinta macluumaadka tirakoobka shirarka dadwaynaha lana xariira gaadiidka. (Sahank xog aruurinta is-aqoonsashada, fariimaha shaqaalaha, iwm.) Ku dar foomamka ka qaybgalka dadwaynaha ee la soo uruuriyey kulan kasta, oo liis gareynaaya xogta dadka shirka cida soo qaybgashay.**

Kooxda gaadiidku waxay iskaashi la sameeyeen Department of Community Development si ay u martigeliyaan dood furan oo ay ka qaybgalaan dadka deegaanka si ay u soo galaan ugana hadlaan mawduuc kasta, oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobneyn isticmaalka dhulka, guryaha, gaadiidka, iyo jardiinooyinka. Magaaladu waxay ku qabatay kulano ay ku qabatay meelo kala duwan oo magaalada oo dhan ah waxayna ku tiirsanayd isku xirka bulshada ee la aamini karo ee ka kala socda kooxo tiro badan si loo dhiirigaliyo ka qaybgalka kulanka. Lama buuxin wax foomam ah oo la xariira ka qaybgalka dadwaynaha.

**3. Qor liiska adeegyada caawimaada luuqad kasta oo la codsaday. Luuqadahee? Yaa bixiyay adeega? Sidoo kale, dukumiintiyada muhiimka ah ee la turjumay inta lagu jiray muddada warbixinta oo sheeg luuqadaha loo turjumay.**

Waqti xaadirkaan, bogagaga webseedyada Magaalada waxaa la turjumay ayadoo la adeegsanaayo GTranslate 15 luuqadood, oo ay kujiraan Isbaanish, Soomaali, iyo Fiirnaamiis. Sidoo kale, qaybo badan oo ka mid ah waxay adeegsadaan LanguageLine Solutions si ay u helaan turjumaada lagu bixiyo taleefoonka oo ku baxda in badan 240 luuqadood. Laga bilaabo Janaayo 1 – Oktoobar, isticmaalka LanguageLine wuxuu ahaa sidaan soo socota:

| **Luuqada** | **Wicitaanada** | **Daqiiqadaha** |
|---|---|---|
| ISBAANISH | 18 | 299.4 |
| FARANSIIS | 7 | 93.5 |
| DARI | 3 | 75.7 |
| AMXAARI | 2 | 55.7 |
| MANDARIN | 2 | 68.8 |
| LUUQADA RUUSHKA | 1 | 17.2 |

Turjumaada fool ka foolka ah waxa qandaraas lagu siiyaa Dynamic Languages, Language Connection LLC, iyo Adams Interpreting. Maxkamada daewlada hoose waxay adeegsataa turjumaano ka socda keydka ay maamulaan loona yaqaano Moli. Maxkamadda Thee waxay sidoo kale isticmaashaa Pocketalk (oo ah aalado turjubaan oo la qaadi karo) si ay u adeegsadaan macaamiishooda LEP. Magaalada waxay iibsatay qalab turjumaanka oo loo adeegsado laba luuqadood, Ingiriis/Isbaanish, barnaamijka horumarinta madaniga ah.

Hoos waxaa ku lifaaqan waa liistada dukumiintiyada muhiimka ah ee la tarjumay. Dukumiintiyada waxaa loo tarjumay Isbaanish, Soomaali, iyo Fiyatnaamiis waxaa turjumay Dynamic Languages.

**11. Heshiisyada Dhismaha iyo La-talinta Gaadiidka (haddii ay khuseyso): Si kooban u qeex habka loo isticmaalo xayeysiinta iyo bixinta qandaraasyada dhismaha inta lagu jiro muddadaan warbixinta. Ku dar nidaamka wada xaajoodka qandaraasyada (tusaale, la-taliyaasha).**

Qandaraasyadeena la-taliyaha ee la xariira gaadiidka, Magaaladu waxay isticmaashaa Municipal Research and Services Center (MRSC) Statewide Roster ama waxay ku daabacdaa Request for Qualification (RFQ) wargeysyada deegaanka, sida caadiga ah Seattle Times iyo Daily Journal of Commerce. Labada xaaladoodba, maamulaha mashruuca wuxuu abuuri doonaa nudaam leh shuruudo wuxuuna kala hormarin doonaa dhammaan shirkadaha daneynaya iyadoo loo eegayo shuruudaha. Marka shirkad la doorto, kooxda iyo la-taliyuhu waxay ka wada xaajoon doonaan baaxada iyo khidmada waxayna geli doonaan qandaraas.

Qandaraasyadeena dhismaha, Magaalada waxay daabacdaa wicitaan loogu talagalay dalabyada wargeysyada deegaanka waxayna soo gelisaa webseedka qorshayaashka Dhismayaasha Exchange Washington (www.bxwa.com) ee qandaraaslayaasha suurtagalka ah inay tixraacaan.

**12. Qeex talaabooyinka la qaaday si kor loogu qaado qandaraaslaha dhismaha/u hogaansanaanta la-talinta ee Title VI ee qandaraaslayaasha/la-taliyaasha dhismaha, oo ay ku jiraan howlaha kormeerka iyo dib u eegista, iyo natiijooyinkooda/xaaladdooda (tusaale ahaan luuqada Title VI ee lagu daray qandaraasyada iyo heshiisyada; qandaraasleyaasha iyo la-taliyaasha dib loo eegay si loo hubiyo u hoggaansanaanta; waxay yihiin mas'uuliyadaha Title VI ma loo sharaxay qandaraaslayaasha iyo la-taliyaasha?)**

Magaalada waxaa ku jira dhammaan Luuqada Title VI ee loo baahan yahay ee kujira heshiiskeena sida lagu qeexay Federal Highway Administration (FHWA) 1273 (qandaraasyada dhismaha) iyo Lifaaqa A iyo E ee Xaqiijinta Kahortaga Takoorka. Magaalada waxaa sidoo kale ka mid ah Luuqada Title VI ee dhammaan Codsiyada Soo Jeedinta/Shahaadooyinka la xariira Mashaariicda lagu helo Gargaarka Dawlada dhexe. Qandaraaslayaasha iyo la-taliyaashu waxay dib u eegaan luuqada waxayna saxiixaan iyagoo qiraya inay u dhaqmi doonaan si waafaqsan Title VI iyo xeerarka kale ee dawlada dhexe ee khuseeya heshiiska.

**13. Liistada dhismaha, wadada midig, iyo qandaraasyada la-taliyaha LPA/Metropolitan Planning Organization (MPO)/hay'addaada inta lagu jiro muddadaan warbixinta oo leh qiimo lacag mid kasta. Aqoonso ilaha maalgelinta sida (dawlada dhexe, gobolka, deegaanka, kuwa kale), iyo inta la siiyay qandaraaslayaasha la xaqiijiyay (sida qandaraaslaha/la-taliyaha koowaad).**

Liistada buuxa ee mashruucyadan jira iyo qandaraasyadeena ayaa ku lifaaqan hoos.

**14. Waxbarashada iyo Tababarka: Qeex tallaabooyinka la qaaday si kor loogu qaado u hoggaansanaanta Title VI iyadoo loo marayo waxbarashada iyo tababarka, oo ay ku jiraan nidaamyada kormeerka iyo dib u eegista, iyo natiijooyinkooda/xaaladooda.**

**1. Liiska Tababarka Title VI/Iskuduwaha Aqoon Iswaydaarsiga Title VI ayaa ka qeyb galay inta lagu jiray muddadan warbixinta. Waxaa ka mid ah taariikhaha iyo hay'adaha qabtay tababarka.**

Catrien de Boer, Falan-qeeyaha Shqooyinka Dadwaynaha, Iskuduwaha Title VI ee Department of Public Works

- Waxay ka qaybgashay tababarka muuqaalka ah ee Title VI ee ay bixisay WSDOT markay taariikhdu ahayd Maayo 30, 2024.
- Waxay ka qaybgashay Tababarka Title VI ee tooska ah ee ay bixisay WSDOY Markay ahayd Sebteember 19, 2024 laguna qabtay Snohomish County Everett Campus.
- Waxay la kulmantay Doris Karolczyk markay ahayd Juun 12, 2024 waxayna kala hadashay shuruudaha kale ee Title VI.

**2. Goorma ayaa la siiyay Shaqaalaha Tababarka Gudaha ee Title VI? Yaa qabtay tababarka? Muxuu ahaa mawduuca tababarka? Bixi cinwaanada shaqada iyo jinsiga/midabka/asalka qaranka ee ka qayb galayaasha.**

Sannadka oo dhan, Catrien waxay la kulantay Maamulayaasha Mashruuca Gaadiidka si ay ugala hadlaan U hogaansanaanta Title VI, gaar ahaan ku saabsan codsiga la-taliyaasha iyo mashaaruucyada dhismaha xayeysiinta. Waxay la kulantay Maamulaha Mashruuca Gaadiidka (oo ah nin cad oo ku dhashay Mareykanka), Maamulaha Barnaamijka Gaadiidka Sare (oo ah haweeney caddaan ah oo ku dhalatay Mareykanka), iyo Injineerka Gaadiidka (oo ah nin cad oo ku dhashay Mareykanka).

**3. Qor xuquuqaha kale ee Tababarka lagu qabto deegaanka. Bixi taariikhaha iyo liiska ka qayb galayaasha jagada shaqada iyo doorka Title VI, haddii ay khuseyso.**

Jo Anderson, Maamulaha Ka qaybgalka iyo Ka Qeybgalinta

- Waxay ka qaybgashay Tababarka Title VI ee tooska ah ee ay bixisay WSDOY Markay ahayd Sebteember 19, 2024 laguna qabtay Snohomish County Everett Campus.
-Waxay si joogto ah u xaadirtaa shirarka Bulshada Helitaanka Luuqadaha Isku-dhafan ee Dhaqanka iyo Shabakadda Helitaanka Luuqadaha Magaalada (Municipal Language Access Network, MLAN).

**15. Hadafyada Title VI ee Sanadada Soo socda**
**Waa maxay qeybta(aha) Title VI ee ay hay'adaadu qorsheynayso inay diirada saarto sanad soo socda? Qeex barnaamij aag gaar ee ay hay'adaadu dooneyso inay dhameystirto. Ku dar aagga kasta oo dhibaato wayn ka jirto si diirada loo saaro loona qorsheeyo sidii wax looga qaban lahaa dhibaatooyinkaas.**

1. ***Shaqaaleysii Ku-xigeenka Agaasimaha Hawlaha Guud/Injineerka Magaalada oo qaadi doona mas'uuliyada Title VI ee Tukwila iyo U Hogaansanaanta iyo Ka warbixinta ADA. Marka sidaan la sameeyo waxaa la gaari doonaan hawlahaan:***
    a. Waxaa balaaranaya dadaalada Title VI ee Magaalada oo dhan ka socda iyo warbixinta, iyo
    b. Bixi kormeerka la-taliyaha iyo qandaraasyada dhismaha ee u hogaansanaanta Title VI.

2. ***Tababarka Title VI***

*Si loo hubiyo in shaqaalaha Hawlaha Guud ee ku lug leh maamulka mashruuca iyo ku dhaqanka qandaraaska ay yihiin kuwo aqoon u leh arimaha suurtagalka ah ee* Title *VI, Iskuduwaha Title VI wuxuu ka qaybqaadan doonaa barnaamijyada tababarka iyo aqoon isweydaarsiyada la bixiyo iyadoo loo maraayo Washington State Department of Transportation sannad kasta.*
*Waxyaabaha tababarka kujira waxaa ka mid noqon kara:*
- *Doorka Iskuduwaha Title VI/Xirfadlayaasha takhasuska leh ee gudaha magaalada*
- *Caawimaada Farsamada ee Arimaha Title VI*
- *Title VI ee dib u eegista aagagga barnaamijka*
- *Habraacyada loo adeegsado cabashooyinka takoorka*
- *Siyaasadaha ururada iyo u hoggaansanaanta Warbixinta Title VI*

3. ***Qorshaha Helitaanka EPIC iyo Luuqadaha***

*Guddi hoosaadka Helitaanka Luuqada ee Gudiga Hirgelinta Siyaasada Sinaanta ee City of Tukwila (Equity Policy Implementation Committee, EPIC) waxay horumarisaa istiraatiijiyada helitaanka luuqada ee u hogaansanaanta Title VI iyo wixii ka dambeeya. Gudi hoosaadku wuxuu kulmaa billo kale wuxuuna ka qeybgalaa kulamada dibeda iyo tababarka la xiriira. Kooxdu waxay dhameystay Qorshaha Helitaanka*

*Luuqada Magaalada waxayna ka shaqeyneysaa qorshe xiriir oo loogu talagalay Sadexda Bilood ee 1aad ee 2025. Kooxdu waxay aqoonsan tahay in mashruucyada Public Works ay leeyihiin waajibaadyo aad u adag oo gaar ah oo la xariira Title Vi. Tani waa xaqiiqo qayb ka ah dadaalka guud, laakiin marka aan ka hadlayno Title VI, waxaan sidoo kale ka hadleynaa inaan ula jeedo hawl kasta oo magaalada ka socota inay tahay inay u hoggaansanto arintan maadaama qaar ka mid ah barnaamijyadeeda ay maalgeliyaan dawlada dhexe.*

*EPIC ayaa sidoo kale fududeysay koox waaxaha oo dhan ka socda si ay dib ugu eegaan nidaamka falanqaynta sinnaanta jinsiga. Luuqada ka baxsan Title VI waxay ahayd goob diirada lagu saaro. Maadaama ay qayb ka tahay shaqadaas, kooxda mashruuca ayaa wareystay daneeyaasha gudaha iyo dibedda si loo ogaado caqabadaha, baahiyaha, iyo fursadaha jira. Warbixinta iyo tallooyinka ayaa ku lifaaqan hoos.*

***Hawlaha Helitaanka Luuqadda ilaa iyo hadda:***

- *Tallooyin isgaarsiinta oo ku saleysan wareysiyada daneeyaasha gudaha iyo dibeda.*
- *42 dukumiinti ayaa loo tarjumay luuqadaha Isbaanish, Soomaali, iyo Fiyatnaamiis.*
- *Abuurista qorshe isgaarsiin oo loogu talagalay LAP magaalada oo dhan.*
- *Sii wadista ka qaybqaadashada Bulshada ee Helitaanka Luuqadaha Dhexdhexaadka ah - Kulanka afaraad ee Xirfadlayaasha Helitaanka Luuqada Dowladda ee WA*
- *Sii wadida ka qayb qaadashada Shabakadda Helitaanka Luuqadaha Magaalada (Municipal Language Access Network, MLAN) - iskaashiga shaqaalaha dowlada si ay u wadaagaan ilaha iyo horumarinada dhaqamada ugu wanaagsan ee kor loogu qaado helitaanka luuqada*
- *Qalabka turjumaada loo adeegsaday (3 nooc oo kamid ah aalada gudbiyaasha/qaataha) ee barnaamijka turjumaamada bulshada ee laba luuqadood, Ingiriisiga iyo Isbaanishka.*
- *Dib u eegista Qorshaha Qabyo qoraalka ee Helitaanka Luuqada*

***Arimaha Dhici doonaa:***

- *Ku darista Jawaabta Tooska ah, Adeegga Luuqadaha*
- *Sii wad inaad ogaato xalalka teknoolajiyadda*
- *Ka qaybgalka Bulshada*
- *Sameeynta kaydinta dukumiintiyada*
- *Horumarinta bogga helitaanka luuqadaha*
- *Horumarinta ilaha tababarka shaqaalaha*
- *Isgaarsiinta gudaha iyo dibedda*

**Waaxda Gaadiidka Mareykanka (United States Department of Transportation, USDOT)**

**Title VI/Xaqiijinta Kahortaga Takoorka**

**Lambarka Amarka DOT 1050.2A**

City of Tukwila (halkan loogu wacaayp "Ka Faa'iidaystaha"), **WAXAAN HALKAAN KU AQBALAYSAA,** maadaama ay tahay shuruud ah in la sameeyo si loo helo kaalmada dhaqaalaha Dawlada dhexe oo kasta oo ay bixiso U.S. Department of Transportation (DOT), iyada oo loo marayo Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Washington (WSDOT), ayadoo ay ku xiran tahay loona hoggaansami doono arimahan soo socda:

**Mas'uuliyiinta Laanta Sharciga/Xeer-ilaalinta**

- Title VI ee Xeerka Xaquuqda Madaniga ah ee soo baxay 1964 (42 United States Code (U.S.C.) § 2000d et seq., 78 stat. 252), (wuxuu mamnuucayaa takoorka ku salaysan jinsiga, midabka, asalka qaranka);
- 49 C.F.R. Qaybta 21 aad (oo ciwaankiiisu yahay Kahortaga Takoorka marka la bixinaayo Barnaamijyada Kaalmada Dawlada dhexe ee laga helo Department of Transportation ayadoo la raacaayo Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee soo baxay 1964);
- 28 C.F.R. qaybta 50.3 (Tilmaamaha U.S. Department of Justice ee Fullinta Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 ee Title VI);

Qodobbada sharciga iyo xeerarka ee halkaan kadib lagu xusi doono waxaa loogu yeerayaa "tallaabooyin" iyo "Xeerar," siday u kala horreeyaan.

**Damaanadaha Guud**

Sida ku xusan Xeerarka, Sharciyada, iyo tilmaamaha kale ee khuseeya, hagitaanada, siyaasada, ogeysiiska, iyo/ama hagida, Qaatuhu wuxuu halkaan ku bixinayaa damaanad ah inuu qaadi doono tallaabooyin kasta oo muhiim ah si loo hubiyo:

> *"Majiro qof jooga Mareykanka, sababo la xiriira jinsi, midab, ama asal qaran, in looga reebo ka qaybgalka, loo diido dheefaha, ama si kale loogu takooraa barnaamij kasta ama hawl kasta, "oo uu qaatuhu ku helo kaalmada maaliyadeed ee Dawlada dhexe, oo ay ku jiraan tan uu ka helo Waaxda Gaadiidka Gobolka gobalka Washington.*

Sharciga Dib usoo Celinta Xuquuqda Madaniga ah ee soo baxay 1987 wuxuu caddeeyay ujeedada dhabta ah ee Koongareeska, iyadoo la tixraacaayo Title VI iyo shuruudaha kale ee aan kala sooca lahayn (Sharciga Ka hortaga Takoorka Dadka waawayn ee soo baxay 1975, iyo Qaybta 504 ee Sharciga Dib u dejinta ee soo baxay 1973), iyada oo dib loo soo celinayo baaxadda ballaaran, hay' adaha oo dhan iyo daboolida sharciyadaan iyo shuruudaha aan takoorka ahayn si loogu daro dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha uu helaayo Qaatuhu, illaa iyo inta qayb kasta oo ka mid ah barnaamijka uu yahay mid dawlada dhexe maalgeliyo.

**Damaanadaha Gaarka ah**

Si gaar ah, ayadoon lagu xadideyn Xaqiijinta Guud ee kor ku xusan, Qaatahu wuxuu aqbalayaa oo uu bixinayaa xaqiijinada sida waafaqsan barnaamijka kaalmada Dawlada dhexe:

1. Qofka helaaya wuxuu aqbalayaa in "hawl kasta," "xarun kasta," ama "barnaamij kasta," sida lagu qeexay §§ 21.23(b) iyo 21.23(e) ee 49 C.F.R. § 21 uu noqon doono (marka la eego "hawsha") la fududeeyay, ama noqon doono (marka la eego "xarunta")

mid laga shaqeeyo, ama wuxuu noqon doonaa (marka la eego "barnaamij") mid la fuliyay iyadoo la raacaayo dhammaan shuruudaha la soo rogay, ama sida ku xusan Xeerarka iyo Sharciyada.

2. Qofka helaaya wuxuu gelin doonaa ogeysiiskaan soo socda dhammaan codsiyada dalabyada, Codsiyada Soo jeedinta Shaqada, ama hawlaha ku xiran Xeerarka iyo Sharciyada la sameeyay ee la xiriira dhammaan Barnaamijyada Wadooyinka ee Dawlada dhexe iyo, hab la jaanqaadaya, dhammaan soo jeedinada heshiisyada wada hadalka iyada oo aan loo eegin ilaha maalgelinta laga helaayo:

> "City of Tukwila, iyadoo la raacaayo qodobada Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee soo baxay 1964 (78 waxay dhigayaan im. 252, 42 U.S.C. §§ 2000d ilaa 2000d-4) iyo Xeerarka, waxaa halkaan lagu ogeysiinayaa dhamaan qandaraas dalbadayaasha in la xaqiijin doono in qandaraas kasta oo la gelay iyadoo la raacayo xayeysiiskaan, shirkadaha ganacsiga ee aadka u hooseeya la siin doono fursad buuxda oo caddaalad ah oo ay ku soo gudbiyaan dalabyadooda uga jawaabaan casuumadaan iyo inaan lagu takoorin sababo la xariira jinsiga, midabka, ama asalka qaranka marka la tixgelinaayo abaalmarintaan."

3. Qofka helaaya wuxuu soo gelin doonaa qodobada Lifaaqa A iyo E ee Xaqiijintaan qandaraas kasta ama heshiis kasta oo ku xiran Xeerarka iyo Sharciyada.

4. Qofka helaaya ayaa u soo gelin doona qodobada Lifaaqa B ee Xaqiijintaan, sida axdi la socda dhulka, ficil kasta oo ka yimaada Mareykanka oo saameynaya ama duubaya wareejinta hantida dhabta ah, qaab dhismeedka, isticmaalka, ama horumarinta ama danaha gaarka ah.

5. Taasi waa marka Qofka helaaya helo kaalmada dhaqaale oo Federaal si uu u dhiso xarun, ama qayb ka mid ah xarun, Hubintu waxay gaari doontaa xarunta oo dhan iyo xarumaha ee xiriirka la leh.

6. Taasi waa marka Qofka helaaya ku helo kaalmada dhaqaale ee Federaal qaab, ama helida hanti dhab ah ama dulsaarka hanti dhab ah, Hubintu waxay gaari doontaa goobta, guud ahaanba, ama hantida hoos timaada.

7. Qofka helaaya wuxuu ku dari doonaa qodobada ku xusan Lifaaqa C iyo Lifaaqa D ee Xaqiijintaan, sida axdi la socda dhulka, talaabo kasta oo mustaqbal, sida kirada, ruqsad bixinta, amaahyda, ama qalabka la midka ah ee uu qaatahu la galay dhinacyada kale:

   a. wareejinta xigta ee hantida dhabta ah ee uu helay ama la dayactiray iyadoo la raacaayo waxyaabaha la qabtay, mashruuca, ama barnaamijka khuseeya; iyo
   b. istcmaalida dhismaha, ama helitaanka, goobta, guud ahaanba, ama hantida dhabta ah ee hoos timaada ee uu helay ama la dayactiray marka la eego waxqabadka khuseeya, mashruuca, ama barnaamijka.

8. In Xaqiijintaan waajib ku tahay Qofka helaaya muddada gargaarka dhaqaale ee dawlada dhexe loo gaarsiiyo barnaamijka, marka laga reebo halka kaalmada dhaqaale ee Dawlada dhexe ay tahay in la bixiyo, ama ay ku jirto qaab, hanti shaqsi, ama hanti dhab ah, ama dano, ama qaab dhismeedyo ama dayactir, taas keenaysa in Dammaanadu waajib uga dhigayso Ka faa'iidaystaha, ama wareejinta kasta inta lagu jiro muddada dheer soo socota:

a. a. muddada inta lagu jiro inta hantida loo adeegsanaayo ujeedo lagu kordhinaayo kaalmada maaliyadeed ee Dawlada dhexe, ama ujeedo kale oo ku lug leh bixinta adeegyada ama dheefaha la midka ah; ama
b. inta lagu jiro muddada qofka helaaya uu haysanaayo ama helaayo hantida.

9. Qofka helaaya ayaa bixin doona habab noocaan oo kale ah ee maamulka oo loogu talagalay barnaamijka sida ay ka heleen Xoghayaha Gaadiidka ama sarkaalka uu/iyadu u wakiilo awood gaar ah si ay u siiyaan dammaanad macquul ah in, helayaasha kale, qaataha, qandaraaslayaasha, qandaraaslayaasha, qandaraasleyda, la-taliyaasha, kala guurka cida sameynaysa, danaha, iyo ka qaybgalayaasha kale ee kaalmada maaliyadeed ee barnaamijkaan hoos yimaada waxay u hoggaansami doonaan dhammaan shuruudaha lagu soo rogay ama sida waafaqsan Xeerarka, Sharciyada, iyo Hubinta.

10. Qaatahu wuxuu aqbalayaa in Mareykanku uu xaq u leeyahay inuu raadsado fulinta garsoorka ee ku saabsan arrin kasta oo ka dhalata Sharciga, Xeerarka, iyo Hubinta.

Marka la saxeexo DAMAANADAAN, City of Tukwila waxay sidoo kale oggolaatay inay u hoggaansameyso (waxayna u baahan tahay in qandaraas hoosaadyada, qandaraasleyaasha, dadka kale, wareejinada, iyo/ama cidda loo xilsaaray inay u hoggaansamaan) dhammaan qodobbada khuseeya ee ku saabsan helitaanka WSDOT sida diiwaanada, akoonnada, dukumiintiyada, macluumaadka, adeegyada, iyo shaqaalaha. Sidoo kale waxaan aqoonsan tahay inaad u hoggaansameyso barnaamij kasta ama dib u eegista u hoggaansanaanta, iyo/ama baaritaan cabasho oo ay sameysay WSDOT. Waa inaad kaydisaa diiwaanada, warbixinada, waana inaad soo gudbisaa waxyaabaha dib u eegista lagu sameynaayo marka aad codsato WSDOT, ama naqshadeeyaha si ku habboon, dhammaystiran, oo sax ah. Intaa waxaa sii dheer, waa inaad u hoggaansameyso dhammaan warbixinta kale, uruurinta xogta, iyo shuruudaha qiimeynta, sida sharcigu qabo ama hagida barnaamijka ee faahfaahsan.

City of Tukwila waxay DAMAANADAAN siisaa tixgelinta iyo tan loogu talagalay helitaanka deeq kasta oo Dawlada dhexe, deyn, qandaraasyo, heshiisyo, hanti, iyo/ama qiimo dhimis, ama kaalmo kale oo maaliyadeed oo lagu helo kaamada-Federaalka iyo Federaalka oo la kordhiyay ka dib taariikhdan dadka qaata Waaxda oo ka hela U.S. Department of Transportation oo hoos timaada Federal Highway Administration. DAMAANADAAN waxaa bixiya Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Washington, cida kale ee helaaya, qandaraaslayaasha, qandaraasleey hoosaadka iyo qandaraas hoosaadyadooda', qofka wareejinaaya, kuwa danaha ka leh, iyo ka qeybgalayaasha kale ee BarnaamijkaWadooyinka ee Federaalka-Aid. Qofka hoos ku saxiixan waxaa loo oggol yahay inuu saxiixo dammaanadadaan isagoo ku hadlaya magaca qaataha.

______________________City of Tukwila_________________

***(Magaca Ka Faa'iidaystaha)***

DocuSigned by:

B0042F1EB33F4BA...

ee _____________________________________

(***Saxeexa Qofka Ogolaanshaha Rasmiga ah haysta***)

11/12/2024 | 11:36 AM PST

KU TAARIIKHEYSAN______________________

## LIFAAQA A

Intii lagu guda jiray muddada fulinta qandaraaskaan, qandaraaslaha, asaga, asxaabtiisa, iyo dadka danaha ka leh (oo hadda loo yaqaan "qandaraasle") wuxuu aqbalay arrimahaan soo socda:

1. **U hogaansanaanta Xeerarka:** Qandaraaslaha (oo halkaan lagu daraayo la-taliyaasha) wuxuu u hogaansami doonaa Xeerarka iyo Sharciyada la xiriira Kahortaga Takoorka barnaamijyada Dawlada dhexe ee Waaxda Gaadiidka ee Mareykanka, Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Washington, maadaama laga yaabo in wax laga badelo waqti ka waqti, oo halkan lagu daraayo tixraac iyo qayb ka mid ah qandaraaskaan.

2. **Ka hortaga Takoorka:** Qandaraaslaha, marka la eego shaqada uu qabto inta lagu jiro qandaraaska, cidna kuma takoori doono sababo la xariira isirka, midabka, ama wadanka u dhalasho marka la xulanaayo iyo joogteynta qandaraas hoosaadka, oo ay ku jiraan soo iibsiga qalabka iyo kirada qalabka. Qandaraasluhu si toos ah ama si dadban ugama qaybqaadan karo takoorka lagu mamnuucay Xeerarka iyo Sharciyada, oo ay ku jiraan dhaqamada shaqada marka hawlaha qandaraasku qabanaayo, mashruuc, ama barnaamij kasta oo lagu qeexay Lifaaqa B ee 49 CFR Qaybta 21.

3. **Codsiyada Qandaraas hoosaadka, oo ay kamid yihiin Habraacyada Agabka iyo Qalabka:** In dhammaan codsiyada, sida codsiga tartan, ama gorgortan ee uu soo gudbiyo qandaraaslaha si ay u qabtaan shaqada qandaraas hoosaadka, oo ay ku jiraan soo iibinta qalabka, ama kireysiga qalabka, qandaraasle kasta oo imaan kara ama alaab qaybiye ayaa lagu ogeysiin doonaa qandaraaslaha marka uu helaayo waajibaadka qandaraaslaha ee hoos imaanaya qandaraaskaan iyo Xeerarka iyo Sharciyada ayadoon lagu saleyn takoorka ku saleysan midabka, jinsiga ama asalka qaranka.

4. **Macluumaadka iyo Warbixinada:** Qandaraasluhu wuxuu bixin doonaa dhammaan macluumaadka iyo warbixinada looga baahan yahay Tallaabooyinka, Xeerarka, iyo tilmaamaha la soo saaray iyadoo la raacaayo waxayna u oggolaan doontaa helitaanka buugaagta, diiwaanada, xisaabaadka, ilaha kale ee macluumaadka, iyo xaruumaheeda maadaam uu go'aamin karo Wakiilka ama Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Washington inay la xiriirto xaqiijinta u hoggaansanaanta Tallaabooyinja, Xeerarka, iyo tilmaamaha. Marka macluumaad kasta looga baahan yahay qandaraasle uu ku jiro hanti gaar ah oo qof kale oo ku guuldareysta ama diiday inuu bixiyo macluumaadka, qandaraasluhu wuxuu si cad u caddeyn doonaa Qandaraaslaha ama Waaxda Gaadiidka Gobolka Washington, sida ku habboon, wuxuuna soo bandhigi doonaa dadaalada uu sameeyay si uu u helo macluumaadka.

5. **Xayiraadaha U Hogaansanaan la'aanta:** Haddii qandaraaslaha uusan u hoggaansamin qodobada kahortaga taloorka ee qandaraaskaan ku xusan, qandaraaslaha ayaa la saari doona cunaqabateyn noocaas ah sida ama Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Washington ayaa go'aamin karta inay ku habboon tahay, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobneyn:

   a. joojinta lacagaha qandaraaslaha helaayo ee hoos yimaada qandaraaska ilaa qandaraasluhu u hoggaansamo; iyo/ama
   b. joojinta, hakinta, ama joojinta qandaraaska, gebi ahaanba ama qayb kamid ah.

6. **Ku darista Qodobada:** Qandaraasluhu wuxuu ku dari doonaa qodobada cutubyada mid ilaa lix ka mid ah qandaraas kasta, oo ay ku jiraan soo iibsiga qalabka iyo kireynta qalabka,

haddii aan laga dhaafin Xeerarka, Sharciyada iyo tilmaamaha la soo saaray iyada oo la raacayo. Qandaraasluhu wuxuu qaadi doonaa tallaabo ayadoo la tixgelinaayo qandaraas kasta ama iibsi kasta oo hoose maadaama Qandaraaslaha ama Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Washington ay toos u sheegi karto sidii loo fulin lahaa qodobbada noocaas ah oo ay ku jiraan cunaqabateyn ka dhalata u hogaansanaan la'aanta. Marka la eego, in haddii qandaraasluhu ku lug yeesho, ama loogu hanjabay dacwad ka dhan ah qandaraas hoosaadka, ama alaab qaybiye, qandaraasluhu wuxuu codsan karaa Qof helaaya inuu gudbiyo dacwad kasta si uu u ilaaliyo danaha Qaataha. Intaa waxaa sii dheer, qandaraaslaha ayaa laga yaabaa inuu ka codsado Mareykanka inay gudbiso dacwadda si loo ilaaliyo danaha Mreykanka.

**TUSMADA B**

**QODOBADA WAAJIBAADKA U WAREEJINTA HANTIDA MAREYKANKA**

Qodobadaan soo socda ayaa lagu dari doonaa tallaabada saameeya ama diiwaan galinaya wareejinta hantida maguurtada ah, qaab dhismeedka, ama hagaajintooda, ama bixinta danaha Maraykanka iyadoo la raacayo qawaaniinta Xaqiijinta 4:

HADDA, SIDAAD AWGEED, Waaxda Gaadiidka ee Mareykanka sida uu sharcigu uu qabo iyo shuruudaha ah in City of Tukwila ay aqbasho lahaanshaha dhulalka oo ay ilaaliso mashruuca lagu dhisay si waafaqsan Title 23, Xeerka Mareykanka, Xeerarka Maamulka Waaxda Gaadiidka ee Gobolka Washington, iyo siyaasadaha iyo habraacyada uu qoray Maamulka Wadooyinka Federaalka ee Waaxda Gaadiidka Mareykanka sida waafaqsan dhammaan shuruudaha lagu ku xusan Xeerka 49, Xeerka Shuruucda Federaalka, Waaxda Gaadiidka Mareykanka, Qoraal hoosaadka A, Xafiiska Xoghayaha, Qaybta 21, Kahortaga Takoorka barnaamijyada dawlada dhexe ee ay taageera Waaxda Gaadiidka Mareykanka ee khuseeya iyo dhaqangelinta qodobada Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah soo baxay 1964 (78. 252; 42 U.S.C. § 2000d ilaa 2000d-4), waxa uu halkaan ku oggolanayaa, ku shaacinayaa, uga tanaasulayaa sheegashadiisa wuxuuna gudbinayaa City of Tukwila dhammaan xaquuqda, lahaanshaha iyo danaha Waaxda Gaadiidka ee Maraykanka ee gudaha iyo dhulka la sheegay in lagu qeexay Bandhiga A ee halkaan ku lifaaqan ee qaybta ka ah.

**(WAAJIBAADKA SHARCI)**

**SI AAD U HAYSATO UNA HESHO** dhulalka iyo danaha halkaan lagu sheegay ee City of Tukwila iyo kuwa ka dambeeya, hase yeeshee, codsiga, shuruudaha, xadidaadaha iyo kaydinta halkaan lagu soo koobay, sida soo socota, taas oo sii jiri doonta muddada ay jirto hantida dhabta ah ama qaab dhismeedyo loo isticmaalo ujeedo ah in kaalmada maaliyadeed ee Dawlada dhexe loo kordhiyo ama ujeedo kale oo ku lug leh bixinta adeegyo ama dheefaha la midka ah waxayna ku xiran yihiin City of Tukwila, kuwa ku guuleuysta iyo kuwa loo xilsaaro.

City of Tukwila iyadoo tixgalinaysa gudbinta dhulalka laga hadlay iyo danaha dhulka, waxay halkan ku dhaqmaysaa axdiga waxayna aqbashay axdi ahaan inay la soconayso dhulka lafteeda, kuwa ku guuleystay ama u xilsaartay, in (1) qofna lagu sameyn takoor ku saleysan jinsiyad, midabka, ama asal qaran, lagana saaro ka qaybgalka, in loo diido dheefaha, ama haddii kale lagu sameeyo takoorid ay kala kulmaan xarun kasta oo ku taal gebi ahaan ama qayb ahaan, waxyaabo intaas ka badan, ama hoos yimaada dhulalkaan la soo gudbiyay. [,] [iyo]* (2) in City of Tukwila ay isticmaali doonto dhulka iyo danaha dhulka iyo dhulalka la soo gudbiyay, iyadoo la raacayo dhammaan shuruudaha lasoo rogat ama iyadoo la raacaayo Xeerka 49, Xeerka Shuruucda Dawlada dhexe, Waaxda Mareykanka ee Gaadiidka, Xeer-hoosaadka A, Xafiiska Xoghayaha, Qaybta 21, Kahortaga Takoorka barnaamijyada dawladda sida ku xusan Waaxda Gaadiidka ee Maraykanka, Saamaynta Title VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee soo baxay 1964, iyo sida lagu sheegay Xeerarka iyo Sharciyada waa la badeli karaa [, iyo (3) in haddii ay dhacdo jebinta mid ka mid ah shuruudaha kahortaga takoorka ee kor ku xusan, waaxdu waxay xaq u yeelan doontaa inay gasho ama dib u geli doontaa dhulalka la sheegay iyo xarumaha dhulka la sheegay, iyo dhulkaas kor lagu tilmaamay iyo xarumaha ayaa dib ugu noqon doona oo gashan doona noqonada doonta hantida saxda ah ee Waaxda Gaadiidka ee Mareykanka iyo waxa loo xilsaaray sida danaha horey u jiray lana xariira tilmaamahan].*

(*Qodobada dib-u-celinta iyo luqadda la xidhiidha in la isticmaalo oo keliya marka la go'aamiyo in qodobkan uu lagama maarmaan yahay si loo caddeeyo ujeedada Title VI.)

**TUSMADA C**

**QODOBADA LA XARIIRA WAREEJINTA HAYSASHADA HANTIDA DHABTA AH AMA KOR U QAADISTA SIDA HOOS TIMAADA HAWLAHA, XARUNTA, AMA BARNAAMIJKA.**

Qodobada soo socda waxaa lagu dari doonaa tallaabooyinka, ruqsadaha, kirada, rukhsadaha, ama qalabka la midka ah ee ay soo saartay City of Tukwila iyadoo la raacayo qodobbada Hubinta 7(a):

A. (Deeq bixiyaha, Amaah qaataha, ruqsad helaha, iwm sida ku habboon) naftiisa/nafteeda, dhaxalkiisa, wakiiladiisa shaqsi, kuw dib ka hela, ayadoo la raacaayo, qayb ka mid ah tixgelinta halkaan ku xusan, wuxuu halkan ku sameeyaa axdi wuxuuna ku raacsan yahay [kiiska tallaabooyinka iyo kirada lagu daray "sida axdi la socda dhulka"] in:

   1. Haddii ay dhacdo xarimaha in la dhiso, la dayactiro, ama si kale loogu shaqeeyo hantida lagu sharaxay halkaan (waajibaadka, ruqsada, kireysiga, ruqsadda, iwm) ujeeddo ay tahay in Waaxda Gaadiidka ee Mareykanka loo kordhiyo ama barnaamij kale oo ku lug leh bixinta adeegyada ama dheefaha la midka ah, ka qaybgalka (deeq bixiyaha, ruqsad qaataha, amaah helaha, ruqsadda, iwm) ayaa ilaalin doona oo ka shaqeyn doona iyo adeegyada ayadoo la raacayo dhammaan shuruudaha lagu soo rogay Xeerarka iyo Sharciyada (sida wax laga badelay), ee dhigaaya inaan qofna la takoori karin ayadoo lagu saleynaayo jinsiyada, midabka, ama asalka qaran, inaan laga saarin barnaamijka, loo diidin dheefaha, ama inaan sidoo kale lagu saleyn takoor loogu geysto xarumaha la xusay.

B. Marka la eego ruqsadaha, kireynta, Amaahyada, iwm, haddii ay dhacdo jebinta mid ka mid ah qodobada kahortaga takoorka ee kor ku xusan, City of Tukwila waxay xaq u yeelan doontaa inay joojiso (kirada, ruqsadda, amaahda, iwm) iyo inay soo gasho, dib usoo saarto, iyo dib u soo celiso dhulalka iyo xarumaha halkaas ku yaala, oo ay la mid tahay haddii ruqsadda (kirada, ruqsadda, amaahda, iwm) aan waligeed la soo saarin ama aan la soo saarin.*

C. Marka la eego talaabada, haddii ay dhacdo jebinta mid kamid ah ballanqaadyada ka dhanka ah ka hortaga takoorka ee kor ku xusan, City of Tukwila waxay xaq u yeelan doontaa inay gasho ama dib u soo celiso dhulalka iyo xarumaha oo ay kujiraan, iyo meelaha kor lagu sharraxay waxay dib ugu laaban doonaan oo lagu celin doonaa hantida City of Tukwila iyo cidda loogu talagalay.*

(*Qodobka Dib u celinta hantida iyo luuqada la xiriirta in la isticmaalo oo keliya marka la go'aamiyo in qodobka noocaan oo kale ah loo baahan yahay si loo caddeeyo ujeedada Title VI.)

**TUSMADA D**

**QODOBADA DHISMAHA/ISTICMAALIDA/ADEEGSASHADA HANTIDA DHABTA AH SIDA HOOS TIMAADA HAWSHA, XARUNTA AMA BARNAMAIJKA**

Qodobada soo socda waxaa lagu dari doonaa talaabooyinka, ruqsadaha, oggolaanshaha, ama qalabka isku midka ah/heshiiska ay gasho City of Tukwila iyadoo la raacayo qodobbada Hubinta 7(B):

A. (Qofka helaaya deeqaha, shatiga, oggolaanshaha, iwm., sida ku habboon) naftiisa/iyadeeda, wakiillada gaarka ah, ku xigeennada danaha, iyo ayaa u xilsaaray, iyadoo qayb ka ah tixgelinta halkaan ku xusan, qodobkaan waxayna aqbaleen (ee kiiska heshiisyada iyo heshiisyadu la isku daro, "sida axdiga dhulka") in
(1) qofna aan lagu sameyn takoor ku saleysan isir, midab, ama asal qaran, aana laga saari doonin ka qaybgalka, loo diidin dheefaha, ama si kale aan loogu sameyn takoor isticmaalka xarumaha la sheegay,
(2) in la dhisayo wixii horumar ah ee laga sameeyay, waxyaabo intaas ka badan, ama dhulkaas hoostiisa, iyo bixinta adeegyada, inaan qofna lagu sameyn takoor ku saleysan isir, midab, ama asal qaran, aan laga saarin ka-qaybgalka, loo diidin dheefaha, ama haddii aan lagu sameyn takoor,
(3) in (qofka helaaya deeqda, shatiga, kirada, oggolaanshaha, iwm.) ay isticmaali doonaan dhismaha sida waafaqsan dhammaan shuruudaha kale ee lagu soo rogay ama ayadoo la raacaayo Xeerarka iyo Sharciyada, sida wax laga badelay, ee lagu sheegay dammaanadaan.

B. Marka la eego (qofka helaaya ruqsadaha, heshiisyada, ogolaanshaha, iwm.), haddii ay dhacdo jebinta mid ka mid ah qodobada kahortaga takoor ee kor ku xusan, City of Tukwila waxay xaq u yeelan doontaa inay joojiso (shatiga, oggolaanshaha, iwm., sida ku haboon) iyo inay soo saarto ama dib u qaadato oo ay la wareegto dhulka la sheegay iyo xarumaha ku yaala halkaas, oo ay haystaan sida haddii la sheegay (shati, oggolaansho, iwm., sida ku habboon) oo aysan waligeed bixin ama soo saarin.*

C. Marka la eego ficilada, haddii ay dhacdo in la jebiyo mid kamid ah qodobada kahortaga takoorka kor ku xusan, City of Tukwila waxay halkaas kula noqon doontaa oo ay ku qaadan doontaa hantida buuxda ee City of Tukwila iyo dadka ay u xilsarto.*

(*Qodobka Dib u celinta hantida iyo luuqada la xiriirta in la isticmaalo oo keliya marka la go'aamiyo in qodobka noocaan oo kale ah loo baahan yahay si loo caddeeyo ujeedada Title VI.)

**Lifaaqa E**

Inta lagu jiro fulinta heshiiskaan, qandaraasluhu, laftiisa, dadka loo xilsaaray, iyo kuwa ku guuleysta (oo halkaan ka dib loogu yeeri doono "qandaraaslaha") waxay oggolaadaan inay u hoggaansamaan xeerarka iyo shuruudaha soo socda ee kahortaga takoorka; oo ay ku jiraan laakiin aan ku koobneyn:

**<u>Maamulka Kahortaga Takoorka ee ku haboon:</u>**

- Title VI ee Xeerka Xaquuqda Madaniga ah ee soo baxay 1964 (42 U.S.C. § 2000d et seq., 78 stat. 252), (wuxuu mamnuucayaa takoorka ku saleysan jinsiga, midabka, asalka qaranka); iyo 49 CFR Qaybta 21.
- Xeerka Kaalmada Dib u celinta Isku dhafka ah iyo Siyaasadaha Helitaanka Hantida Dhabta ah ee soo baxay 1970, (42 USC.
  § 4601), (wuxuu mamnuucayaa in si aan caddaalad ahayn loola dhaqmo dadka barakacay ama hantidooda lagu helo sababo la xiriira barnaamijyada iyo mashaariicda gargaarka dawlada dhexe ama dawlada dhexe);
- Xeerka Wadooyinka ee soo baxay 1973, (23 USC § 324 et seq.), (wuxuu mamnuucayaa takoorka ku saleysan jinsiga);
- Qaybta 504 ee Sharciga Dib u Habbeynta ee soo baxay 1973, (29 USC § 794 et seq.), sida wax laga badelay, (wuxuu mamnuucayaa takoorka ku saleysan naafonimada); iyo 49 CFR Qaybta 27;
- Sharciga Takoorka dadka waawayn ee soo baxay 1975, ee wax laga badelay, (42 USC § 6101 et seq.), (wuxuu mamnuucayaa takoorka ku saleysan da'da);
- Sharciga Hagaajinta Garoonka Diyaaradaha iyo Hawada ee soo baxay 1982, (49 USC § 471, Qeybta 47123), ee wax laga badelay, (wuxuu mamnuucayaa takoor ku saleysan jinsi, caqiido, midab, asal qaran, ama jinsi);
- Sharciga Soo Celinta Xuquuqda Madaniga ah ee soo baxay 1987, (PL 100-209), (Ballaarinta baaxada, daboolua iyo codsiga Title VI ee Sharciga Xuquuqda Madaniga ah ee soo baxay 1964, Sharciga Takoorka dadka waawayn ee soo baxay 1975 iyo Qaybta 504 ee Sharciga Dib U Habeynta ee soo baxay 1973, iyadoo la ballaarinaayo qeexitaanka ereyga "barnaamijyada ama waxqabadyada" si loogu daro dhamaan barnaamijyada ama waxqabadyada ay ku jiraan barnaamijyada ama waxqabadyada ay bixiyaan, kuwa hoos yimaada, iyo qandaraaslayaasha, haddii barnaamijyada noocaan oo kale ah lagu maalgeliyo deeqda dawlada dhexe iyo haddii kaleba);
- Xeerka II iyo III ee Sharciga Naafada Mareykanka, oo mamnuucaya takoorka ku saleysan naafonimada ayadoo loo eegayo awooda ay ku qaban karaan shaqada, nidaamyada gaadiidka dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay, meelaha hoyga dadweynaha, iyo hay' adaha baaritaanka qaarkood (42 U.S.C § 12131-12189) sida lagu hirgeliyay Xeerarka Gaadiidka ee 49 C.F.R. qaybaha 37 iyo 38;
- Sharciga Maamulka Duulista ee Dawlada dhexe (49 USC § 47123) (wuxuu mamnuucayaa takoorka ku saleysan jinsiga, midabka, asalka qaranka, iyo jinsiga);
- Amarka Fulinta ee soo baxay 12898, Talaabooyinka Dawlada dhexeee wax looga qabanayo Cadaalad darada Deegaanka ee Dadka Yaryar iyo Dadka Dakhliga Yar hela lagula kaco, kaas oo xaqiijinaya in aan la takoorin dadka yaryarka iyada oo laga niyad jebinaayo barnaamijyada, siyaasadaha, iyo waxqabadyada si aan ku haboonayn caafimaadka bini'aadamka ama saameynta deegaanka ee dadka yar iyo dadka dakhliga hoose hela;
- Amarka Fulinta soo baxay 13166, Kor u qaadista Helitaanka Adeegyada Shakhsiyaadka leh Aqoonta Ingiriisiga ee Xaddidan, iyo hagida hay'adda ee ka dhalatay, takoorka asalka qaranka waxaa ka mid ah takoor lagu saleeyay aqoonta Ingiriisiga xadidan (LEP). Si aad u hubiso u hoggaansanaanta Title VI, waa inaad qaadataa tallaabooyin macquul ah si aad u hubiso in dadka LEP ay helaan barnaamijyadaada micnaha leh (70 Fed. Diiwaanka. ee 74087 ilaa 74100);
- Title IX ee Wax ka badelka Waxbarashada ee soo baxay 1972, see wax laga badelay, ayaa mamnuucaya inaad sameyso takoor ku saleysan jinsiga lana xariira barnaamijyada waxbarashada ama waxqabadyada (20 USC 1681 et seq).

Washington State
Department of Transportation

Tusmada 28.92

# Warqad loogu talagalay in Loogu Hogaansamo Qorshaha Title VI ee WSDOT

La jaabqaadida Qorshaha Title VI, City of Tukwila waxay ogolaatay inay u hoggaansanto Qorshaha Title VI ee WSDOT.

City of Tukwila waxay xaqiijinaysaa in qofna aan sabab takoor loogu sameeyo looga dhageyn isir, midab, ama asal qaran, sida uu dhigayo Title VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee soo baxay 1964, iyo Xeerka Soo Celinta Xuquuqda Madaniga ah ee soo baxay 1987 (PL. 100.259) iyo inaan laga saari karin ka qaybgalka, loo diido karin dheefaha, ama lagu sameeyo takoor hoos yimaada barnaamij kasta ama hawl kasta. City of Tukwila waxay kale oo xaqiijinaysaa in dadaal kasta lagu bixin doono sidii loo xaqiijin lahaa kahortaga takoorka ee dhammaan barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda, haddii barnaamijyadaas iyo waxqabadyadaas ay yihiin kuwo federaalku maalgeliyo iyo haddii kaleba.

Xeerka Soo Celinta Xuquuqda Madaniga ah ee soo baxay 1987, waxa uu balaariyay baaxadda caymiska Title VI iyada oo la balaariyey qeexida ereyada "barnaamijyada ama hawlaha" si loogu daro dhammaan barnaamijyada ama hawlaha dawlada dhexe, kuwa qaata qandaraas hoosaadyada, iyo qandaraaslayaasha/la taliyaasha, haddii ay yihiin barnaamijyada iyo Hawlaha gaar ahaan kuwa lagu maalgeliyo dakhliga dawlada dhexe iyo haddii kaleba (Sharciga dadwaynaha 100259 [S.557] Maarso 22, 1988).

Marka ay dhacdo in City of Tukwila bixiso maalgelinada federaalku bixiyo laguna bixiyo qandaraas hoosaadka, City of Tukwila waxay ku dari doontaa luuqada Title VI dhammaan heshiishyada qoraalka ah waxayna la socon doonaa sida loogu hogaansamo.

City of Tukwila ayaa mas'uul ka ah bilaabista iyo la socodka hawlaha Title VI, uruurinta xogta, diyaarinta warbixinada (oo ay ku jiraan kan Lifaaqa 28.93) iyo masuuliyadaha kale sida lagu qeexay Xeerka 23 ee Sharciga Dawlada Dhexe (Code of Federal Regulation, CFR) 200 iyo Xeerka 49 ee Sharciga Dawlada dhexe, WSDOT Qorshaha Title VI, iyo WSDOT Buuga Tilmaamaha Deegaanka.

DocuSigned by:
B0042F1EB33F4BA...

Saxeexa

Agaasimaha Hawlaha Guud
Jagada

11/12/2024 | 11:36 AM PST
Taariikhda La fuliyay

Pete Mayer, Agaasimaha Hawlaha Guud
Magaca iyo Jagada Maamulaha Hawlaha Guuds/Gaadiidka

Pete/mayer@tukwilawa.gov
Ciwaanka Iimaylka

Catrien de Boer, Falanqeeyaha Hawlaha Guud
Magaca iyo Jagada Iskuduwaha Title VI

Catrien.deBoer@tukwilawa.gov
Ciwaanka Iimaylka

**Dhukumiintiga Muhiimka ah:** dhukumiintiga USDOT1050.2a oo saxeexan waxna laga badelin, Damaanada Caadiga ah ee Title VI